Maamulka waxbarashada

Göteborgs Stad

# Dugsi aan maan-dooriye laheyn

**ee dugsi sare iyo dugsi saree qaasa iyo waxbarashada dadka waaweyn ee aan u dulqaadaneyn maan-dooriye**



www.goteborg.se/utbildning

# Adiga ardayga ah ama mas'uulka sharci ee arday dhigta dugsiga sare iyo dugsiga sare ee qaaska

## Aan u dul qaadaneyn qamriga iyo maan-dooriyaha iskuulka

Iskuulka ayaa ah goob shaqo ee mamnuuc ka yahay maan-dooriyaha. Sida uu qabo sharciga bey'adda shaqada waa in hogaanka iskuulku qaadaa dhamaan talaabooyinka loo baahan ahay si looga hortago in ardayda iyo shaqaalaha ay soo wajahaan caafimaad-daro iyo shil

## Muxuu sameynayaa iskuulka haddii howl maan-dooriye laga shakiye iney jirto ama la xaqiijiyo iney jirto?

Maamulaha ayaa ardayga uga yeerayo shir deg dega. Tan waxa la sameynayaa iyadoo lagala tashaday shaqaalaha aafimaadka ardayda. Maamulaha ayaa u yeerayo as'uulka sharciga ardayga haddaanu aheyn qaan-gaar. Haddii ardaygu yahay qaan-gaar waxaa quman in ehelka ku dhaw dayga/mas'uulkiisa masruuf looga yeero kulanka haddii ardaygu ogolaado taa. Kulanka waxa lagu o'aaminayaa qorshe waxqabad oo leh kala qeybsi mas'uuliyad iyo diiwaan-gelinta arinta Haddii ardaygu marar isku xig-xigta arbusho nidaamka, u dhaqmo si aan habooneyn ama galo fal gef weyn ah markaa maamulaha ayaa taa baarayo. Markaa kadib wuxuu aamuluhu go'aamin kara digniin. Haddii isticmaalka maan-dooriyaha  ardaygu keento dhaqan buuxiya asaaska wax lagu saleeyo sharciga iskuulka maamulaha wuxuu gaari karaa go'aan

## Iskuulku ma ku qasbi karaa ardayga sameynta baarid maan-dooriye?

Maamulaha ayaa si aan qasab aheyn uga codsan kara ardayga inuu sameeyo baarid maan-dooriye iyadoo ardaygu markaa saxiixayo ogolaasho ka hor baaridda. Baaritaanka maan-dooriye ee aan qasabka aheyni waxey kaloo dhici kartaa markey dhacaan warbixin iyo qoraal heshiis ah kadib haddii taasi loogu baahdo shaqo baraaktiik ama waxbarasho goob shaqo loo tegayo.

## Iskuulku mar kastaa ma ku wargelinayaa xafiiska adeegga bulshada howlaha maan-ooriyaha?

Haddii looga shakiyo howlo maan-dooriye arday aan qaan-gaar aheyn waxa iskuulku mar kastaa taa wargelinayaa xafiisa adeegga bulshada. Haddii ardaygu yahay qaan-gaar waa in la wargeliyaa adeegga bulshada xaafadaha ama komuunka ardaygu ka tirsan yahay. Ujeedooyinka wargelinta ayaa waxa ka mida in ardayga iyo waalidkuba helaan gargaar in sida ugu wacan loogu maareyo arintan.

## Muxuu iskuulku sameynayaa haddii ardaygu yimaado iskuulka isagoo isticmaalay maan-dooriye?

- Waxa lala xiriirayaa mas'uulka sharci ee ardayga aan qaan-gaarka aheyn, ehelkiis/mas'uulkiisa masruuf haddii ardaygu qaan-gaarka ahi bixiyey ogolaasho.

- Boliiska ayaa loo yeerayaa haddii loo aahdo.
- Iskuulka ayaa wargelinaya adeegga bulshada haddii ardaygu yahay mid aan qaan-gaar aheyn. Wargelinta ku saabsan ardayga qaan-gaarka waa in la sameeyaa.
- Maamulaha ayaa sida ugu haqsaha badan leh kulan ugu yeeraya go'aaminayana qorshaha axqabad.

## Muxuu sameynayaa iskuulka haddii arday looga shakiyo inuu iibinayo maan-dooriye?

- Maamulaha ayaa lala xiriirayaa.
- Maamulaha ayaa boliiska wargelinayo.

## Yaad iskuulka kala hadli kartaa haddii kartaa haddii aad u baahan tahay gargaar iyo talo ku saabsan dhibaatada qamriga iyo maan-dooriyaha?

La xiriir macalinka ugu sokeeya, maamulaha ama caafimaadka ardayga ee iskuulka.

## Iskuulka ayaa la haqeeya Mini-Maria Göteborg

Mini-Maria Göteborg ayaa ka kooban afar qaabilaad daryeel furan ee dhalinyarada jira ilaa iyo 21 sano, kuwaasoo qaba su'aalo ama welwel la xiriira qamriga, maan-dooriyaha ama daroogada kale. Mini-Maria Göteborg waxay bixisaa warbixin, talooyin iyo daryeel shaqsiga iyo reerkiisa iyo ehelkiisa.

Mini-Maria waxa ka shaqeeya aqoonyahano bulsho, kalkaaliyaal caafimaad, takhasus cilmi-nafis, dhaqaatir iyo umuliso. Mini-Maria isla wada magaalada Göteborg iyo gobalka galbeedka Götaland. Warbixin intaa dheer waxad ka heleysaa adareeska: www.minimaria.se

## Shaqada ka hortagga maan-dooriyaha ee maamulka waxbarashada waxay salka ku heysaa dhowr sharci:

• Sharciga iskuulka (2010:800), cutub 5.
• Qaraarka (2011:1108) ee waxbarashada dadka waaweyn, cutub 7.
• Sharci (2009:128) ee jaamacad xirfadeedka.
• Qaraarka (2009:130) ee jaamacad xirfadeedka.
• Sharciga adeegga bulshada (2001:453), cutub 14. Wargelinta iyo caawinta xaaladaha xun iwm.
• Sharciga bey'adda shaqo (1977:1160), cutub 3 2§
• Sharciga dadweynaha iyo kan xogqarinta (2009:400), cutub 25.
• Ku kordhinta guud – sharciga dadweynaha iyo kan xog-qarinta (2009:400), cutub10 27 §

# Adiga ardayga ah ama mas’uulka sharci ee arday dhigta dugsiga sare iyo dugsiga sare ee qaaska.

**Hadafka wada-shaqeynta arimaha ardayda dugsiga sare iyo dugsiga saree qaaska ah ee dhibaatooyinka qamriga iyo/ama dhibaatooyinka kale ee maan-dooriyaha**

Iskuulka ayaa qabanaya howl ka hortag maan-dooriye ee nidaam iyo qaab leh. Iskuulka ayaa la shaqeynaya Mini-Maria iyo adeegga bulshada si inti la karo loogu hormariyo caawinta ardayda qabta dhibaatada ku takri-falka maan-dooriyaha.

| WAXQABAD | FULIYE | MAS'UUL |
|---|---|---|
| *Ardayga iyo mas'uulkiisa in dhaqso loogu yeero kulan sida uunqabo Sharciga iskuulka cutub 5  9 §. Ardayga qaan-gaarka waxa lagu guubaabinayaa inuu kulanka la yimaado mas'uulkiisa masruuf.* | *Maamule* | *Maamule* |
| *Kulanka waxa ardayga la soo hordhigayaa shakiga iyo in wargelin (ardayga aan qaan-gaarka aheyn) la siin doono adeegga bulshada. Wargelinta ayaa sidoo laga sameynayaa ardayga qaan-gaarka ah.* | *Maamule* | *Maamule* |
| *Ardayga iyo mas'uulkiisa waxey helayaa warbixinta Mini-Maria iyo casuumaad la kulankooda.* | *Maamule ama caafimaadka ardayga* | *Maamule ama caafimaadka ardayga* |
| *Sameynta qorshe waxqabad. Ogolaashaha is-haafsiga warbixinta ee hey'adaha muhimka (iskuulka, adeegga bulshada, Mini-Maria) ayaa wacan in la helo.* | *Maamule ama caafimaadka ardayga* | *Maamule ama caafimaadka ardayga* |
| *Wargelinta adeegga bulshada ayaa in lagu sameeyo foomka wargelinta ee loogu tala galay. Foomka waxa lagu udbinayaa warbixinta waqti ee kulanka qorshaha.* | *Maamule ama caafimaadka ardayga* | *Maamule ama caafimaadka ardayga* |
| *Baarid maan-dooriye aan qasab aheyn qoraalka kadib. Ogolaasho inuu qoro ardayga, haddaanu aheyn qaan-gaar waxa kaloo loo baahan yahay saxiixa mas'uulka.* | *Maamule* | *Maamule* |
| *Mini-Maria in lala xiriiro oo balan qorshe kulan laga sameeyo.* | *Maamule ama caafimaadka ardayga* | *Maamule ama caafimaadka ardayga* |

## UJEEDO

Ogaasho goor hore, waxqada deg-dega rutiin haqeynaya ee dugsiga sare, dugsiga saree qaaska Mini-Maria iyo adeegga bulshada ee xaafadaha ama komuunka ardaydu ka tirsan yahay marka ardaygu qabo dhibaato takri fal maan-dooriye.

## HADAF

In ardaygu joojiyo balwadda iyo in si wada jira loo abuura fursad ardaygu ku dhameysan karo warbarashada dugsiga sare.

| WAXQABAD | FULIYE | MAS'UUL |
|---|---|---|
| *Mini-Maria waxey bixiyaan kulan qorshe mudo 14 maalmood gudahood. Ardayga iyo waalidka in lagu wargeliyo waqtiga.* | *Maamule caafimaad arday Mini-Maria* | *Maamule caafimaad arday Mini-Maria* |
| *Adeegga bulshada ayaa markuu helo wargelinta dib ugu soo warcelinayo iskuulka.* | *Adeegga bulshada* | *Adeegga bulshada* |
| *Kulanka qorshe ee ardayga iyo mas'uul-ka/mas'uulka masruuf.*<br>*Diiwaan-gelinta sii socota ee qorsha waxqabadka.* | *Maamule caafimaad arday Mini-Maria* | *Maamule caafimaad arday Mini-Maria* |
| *Tegidda ardayga daaweeynta. Hadii talo-siin iyo daaweyn arday aan loo arkin iney ku filan tahay waa in la siiyaa wargelin taagan adeegga bulshada.* | *Mini-Maria* | *Mini-Maria* |
| *Ku warcelinta shaqaalaha taagan ee iskuulka.* | *Mini-Maria* | *Mini-Maria* |
| *Ku warcelinta adeegga bulshada, haddii sidaa lagu heshiiyey.* | *Mini-Maria* | *Mini-Maria* |
| *Kulan la socosho marka loo eego qorshaha waxqabadka ee ardayga, mas'uulkiisa/mas'uulka masruufka.* | *Maamule caafimaad arday Mini-Maria* | *Maamule caafimaad arday Mini-Maria* |

# Adiga arday ka ah waxbarasha-da dadka waaweyn ee degaanka iyo jaamacadda xirfadda

Iskuulka ayaa ah goob shaqo aan loo ogoleyn maan-dooriye. Ardayga u jooga baraaktiik ama waxbarasho shaqo (APL/LIA) waa inuu raacaa shu-ruucda goobta shaqo. Sidaa darteed waxa ardayga APL/LIA lagu guubaa-binayaa inuu sameeyo baaritaan maan-dooriye haddii goobta shaqadu taa codsato.

## Muxuu sameynayaa skuulka haddii howl maan-dooriye laga shakiye iney jirto ama la xaqiijiyo iney jirto?

Maamulaha ayaa dhaqso isugu yeerayo kulan arday-ga, macalinka ay quseyso/mas'uulka kooraska iyo la taliyaha bulsho. Kulanka waxa lagu go'aaminayaa qorshe waxqabad oo leh mas'uuliyad qeybsi cad iyo diiwaan-gelin.

## Waxbarashada dadka waaweyn ee degaanka

Haddii isticmaalka maan-dooriyaha ardaygu keento dhaqan buuxiya shuruudaha sharciga iskuulka ee ka joojinta iskuulka markaa maamulaha ayaa taa go'aan gaaraya baaritaan kadib.

## Jaamacadda xirfadda

Haddii ardaygu ku takri falo qamri ama maan-doo-riye taasoo keeneysa in ardaygu qatar ugu jiro inuu dhaawac u geysto qof kale ama hanti muhima xiliga waxbarashada, markaa ardayga waxa joogto looga joojin karaa wax-barashada.

## Talaabooyinka ardayga istic-maala maan-dooriye

- Arday aad u isticmaala maan-dooriye waxa loo diidi karaa inuu joogo iskuulka/goobta shaqo.
- Boliis ayaa loo yeerayaa haddii loo baahdo.
- Maamulaha ayaa kulan isugu yeerayo ardayga, macalinka ay quseyso/mas'uulkakooraska iyo la taliyaha bulsho.

## Talaabooyinka la qaadayo haddii uu yimaado shaki iibin maan-ooriye

- Maamulaha ayaa lala xiriirayaa.
- Maamulaha ayaa boliiska wargelinayo.

Göteborgs Stad 180615-009-610 Foto: Lo Birgersson Tryck: Lenanders Grafiska AB Augusti 2018